

MAARAYNTA DADKA KU DHINTA COLAADA:

BUUG HAGE AH OO LOOGU TALA-GALAY
MILITARIGA IYO CIIDAMADA AMMAANKA



ICRC

MAARAYNTA DADKA KU DHINTA COLAADA:

**BUUG HAGE AH OO LOOGU TALA-GALAY
MILITARIGA IYO CIIDAMADA AMMAANKA**

Tusmada buugga

1. Tixgelinnada muhiimka ah ka hor inta aanad ka jawaabin. **2**
2. Qalabka Badbaada Shakhsiga(PPE)..... **3**
3. Diiwaangelinta iyo Qalabka..... **5**
4. Muhiimadda ay leedahay Isu-gudbinta Xanaaneynta (COC) **7**
5. Calaamadda maydka iyo summadeynta u gaarka ah maydka ama xubin ka mid ah maydka **8**
6. Koox koox ugu kala saar goobta wax ka dhaceen **9**
7. Ka qaad hubka..... **10**
8. Calaamadda gaarka ah ee aqoonsiga **11**
9. Maydka la soo helay oo la geliyo bacda maydka.....**12**
10. Diiwaangelinta..... **19**
11. Daad-guraynta iyo Kaydinta **24**
12. Dhaqamada Aaska iyo Qabuuraha **25**

1. Tixgelinnada muhiimka ah ka hor inta aadnad ka jawaabin:

1. **Qiimee goobta** iyo nawaaxigeeda si loo ogaado haddii ay jiraan khataro.
2. Hubi in **dadka dhaawaca ah** la siiyo mudnaan.
3. **Mas'uuliyiinta caafimaadku** waa in ay xaqiijiyaan dhimashada.
4. **Ka ilaali goobta** faragelinta dadka, duunyada iyo deegaanka
5. Hubi in oggolaanshaha lagu soo galo goobta iyo soo saarka maydadku ay bixiso **silsilada kala sarreynta** ama hay'ad ku habboon oo awooda u leh.
6. Ku hawlgal **wada shaqaynta** iyo **isku-duwidda** hay'adaha kale ee bixin kara aqoon xirfadeed, kugu caawin kara shaqaalaha, qalab ama ay leeyihiin waajibaad wax ku baari karaan.

2. Qalabka Badbaadada Shakhsiga (PPE)



Gacmo gashiyo maqaar ah – qaadista qashinka si maydka loo soo saaro

Indho Gashi (Ookiyaale)

Af-saabka caafimaadka

Gacmo gashiyo nitrile ah (waa qasab)

Labbiska caafimaadka oo mar kaliya la isticmaalo

Labbiska iskutolka

Buudh rabadh ah


Dadaalada dib-u-soo helida maydka awgeed wax yaabaha waajib ku ah goobta wax ka dhaceen: Gacmo gashiyada Latex/Nitrile ee mar kaliya la isticmaalo

Wax yaabaha ikhtiyaariga ah/iyadoo ku xiran tahay goobta wax ka dhaceen:

Dhammaan alaabta kale ee lagu muujiyey sawirka waa kuwo la door bidayo, laakiin, inta badan oo aan la haysan ama in la haysto qaar ka mid ah alaabta la muujiyey kama reebeysa qof in uu soo saaro maydka



1



4




3

2



10



8

7

9



11



6



5

3. Diiwaangelinta iyo Qalabka

QALABKA LOOGU TALAGALAY MAYDKA LA SOO SAARO EE LOOGA BAAHDO GOOBTA WAX KA DHACEEN:

1. Bacaha maydka la geliyo
2. Halkii mayd ama xubin ka mid ah maydka laba calaamadood
3. Halkii mayd ama xubin ka mid ah maydka laba fasheeto
4. Bacda caddaynta/bacda alaabta shakhsiga
5. Mastarad lagu cabbiro
6. Mitir/Mitiriye
7. Qalinka wax lagu calaamadiyo
8. Qalin
9. Buugga xusuus-qorka
10. Halkii Foomka Maydka ah waxaa loogu talagalay hal mayd ama xubin ka mid ah maydka
11. Kaamarad iyo kaarka xogta kaydiyo (memory card) oo > 64GB ah (batariyo dheeraad ah)

Checklist of Laboratory Forms
 قائمة و فهارس النماذج

Institution's Name اسم المؤسسة	
Unique Identifying Number رقم التعريف الخاص	Unique Name Number of the study or study part or specimen (from 2002 used every 10 numbers of numbers), Number of the necessary copies of the necessary forms or packets/boxes of necessary forms (necessary forms must be in Arabic and English) (from 2002 used every 10 numbers of numbers), Name of the study or specimen (from 2002 used every 10 numbers of numbers)
Name الاسم	Description الوصف

Name الاسم	Location المكان	Name of Person اسم الشخص	Title/Occupation المهنة	Organization المؤسسة	Date التاريخ	Time الوقت	Signature التوقيع	Name الاسم
1								

Name الاسم	Location المكان	Name of Person اسم الشخص	Title/Occupation المهنة	Organization المؤسسة	Date التاريخ	Time الوقت	Signature التوقيع	Name الاسم
2								

Name الاسم	Location المكان	Name of Person اسم الشخص	Title/Occupation المهنة	Organization المؤسسة	Date التاريخ	Time الوقت	Signature التوقيع	Name الاسم
3								

Name الاسم	Location المكان	Name of Person اسم الشخص	Title/Occupation المهنة	Organization المؤسسة	Date التاريخ	Time الوقت	Signature التوقيع	Name الاسم
4								

Name الاسم	Location المكان	Name of Person اسم الشخص	Title/Occupation المهنة	Organization المؤسسة	Date التاريخ	Time الوقت	Signature التوقيع	Name الاسم
5								


4. Muhiimadda ay leedahay Isu-gudbinta xanaaneynta (COC)

COC WUXUU XAFIDAA DHAQDHAQAAAQA RAAD- RAACA IYO XANAANEYNTA:

1. Maydka ama xubin ka mid ah maydka
2. Dharka iyo alaabta lala xiriiriyo shakhsiga

Xaalad(kiis) kasta ku buuxi Foomka Isu- gudbinta Xanaaneynta(COC).

5. Calaamada maydka iyo summadeynta u gaarka ah maydka ama xubin ka mid ah maydka



TUSAALE FUDUD EE LAGU ABUURAYO SUMMAD GAAR AH EE LAGU AQOONSANAYO MAYD KASTA AMA XUBIN KA MID AH MAYDKA EE LA SOO ARUURUIYEY:

Maydka (M1001) ama Xubin ka mid ah maydka (QM1001) lambarka-

Lambarka kooxda (T iyo lambarka) – Xarfaha ugu horreya magaca qoraha (4 xaraf) – Taariikhda (MMBB) – Waqtiga saxda ah ee maalinta

(24 saac - SSMM)

6. Koox koox ugu kala saar goobta wax ka dhaceen, xisaabi inta mayd iyo inta xubno maydadka ka mid ah loo baahan yahay in la soo saaro, u qaybi shaqaalaha iyo qalabka si ay hawsha u fuliyaan.



Maydadku waxay noqon karaan kuwo dhammaystiran ama kuwo aan dhammaystirnayn. Xubnaha maydadka sidoo kale waxay u baahan yihiin in la soo saaro oo si xirfadeysan loo habeeyo.



7. Waa in la qaadaa dhammaan wixii hub iyo rasaas ah ka hor inta aan maydka ama xubin ka mid ah maydka wax laga qaban, la dhaqaajinin, la gelin bacda maydka ama weel.

Xasuusnoow in lambarada hubku ay kaa caawin karaan aqoonsiga maydka sidaa darteed diiwaangeli wixii maydka laga soo saaray.

8. Si loo hubiyo sii socoshada qayb maydka ka mid ah, alaabta shakhsiga iyo diiwaangelintaba, mayd kasta iyo/ama xubin kasta oo ka mid ah maydka waa in lagu calaamadeeyaa barta laga soo saaray iyagoo wataan summadda gaarka u ah ee lagu aqoonsanaayo taas oo ka muuqan doonta shaqada waraaqaha kale ee waafaqsan.



9. Maydka la soo helay oo la geliyo bacda maydka



Tallaabada 1-aad:

Isku hagaaji bacda maydka la geliyo ama si dherer ah maydka oo dhabarka bannaanka u yaalo u barbar dhig bacda maydka la geliyo. Hubi in lambarka maydka u gaarka ah ee loo qoondeeyey ay waafaqsan tahay calaamadda maydka ku dheggan tahay iyo mida bacda maydka ku dheggan tahay.



Tallaabada 2-aad:

Maydka hal dhinac u janjeeri. Ilaa kala bar duub bacda maydka la geliyo. Jiid bacda maydka ilaa iyo la sinaato maydka.



Tallaabada 3-aad:

Si xushmad leh maydka u dul saar bacda maydka.



Tallaabada 4-aad:

Maydka oo dul saaran bacda maydka u janjeeri dhinaca ka soo horjeeda.



Tallaabada 5-aad:

Kala bixi bacda maydka ka dibna maydka dhex geli bacda maydka.




Tallaabada 6-aad:
Dabool bacda maydka





Si looga fogaado hawl aan loo baahnayn iyo dhaawac soo gaaro kuwa maydka xanaaneynaya farsamadan maydka la soo helay oo la geliyo bacda maydka waxay yaraynaysaa baahida loo qabo in maydka kor loo qaad qaado si loo geliyo bacda maydka.

10. Diiwaangelinta

Diiwaangelinta sifooyinka maydka ka hor intaan la aasin waxay muhiim u tahay aqoonsiga mustaqbalka iyo sidoo kale in loo celiyo qoysaska marka ay suurto gal tahay.







Diiwaangelinta iyo sidoo kale sawirka oo la socda masterad si loogu cabbiro sifooyin kasta oo cad oo lagu aqoonsan karo oo gacan ka geysan karta aqoonsiga dambe ee qofka dhintay. Sifooyinka waxaa ka mid ah nabarrada, taatuuska, cilladaha aan caadiga ahayn, xubin la gooyey oo bogsatay, calaamado ku yaala maqaarka, iwm.



Jeebabka iyo jirka maydka ka baar alaabta shakhsiga kuwaas oo kaa caawin kara aqoonsiga.


Diiwaangeli oo sawir dhammaan alaabta shakhsiga hubi in alaabtaas la kaydiyey lana ilaaliyo si loogu adeegsado aqoonsiga qofka dhintay iyo in loo celiyo eheladooda.



11. Daad-guraynta iyo Kaydinta

1. Hadafka deg degga ah waa in **la xafido meydadka**. Ka hortag in goobta wax ka dhaceen maydka si toos ah ugu dhicin kulayl iyo iftiinka qorraxda oo aan loo baahnayn. Ka-jawaabayaasha caafimaadka u geey maydadka meelaha harka leh, heerka qurmidda maydadkana yaree.
2. Ku qaad maydadka **baabuur deddan** iyadoo la ixtiraamayo sharafta maydka, ilaalinta, xafidaada meydadka, alaabtood, iyo in la yareeyo saameynta ay ku yeelanayaan bulshooyinka ay dhibaataadu saameysey (oo ay ku jiraan shaqaalaha jaalka ah).
3. **Ku kaydinta qaboojiyaha** waa lagama maarmaan haddii maydadka la doonayo in lagu kaydiyo meel dhulka ka sarreysa. Maydadku waa in lagu qaboojiyaa inta u dhaxaysa 2 iyo 4 darajo ee Celsius.
4. **Haddi aanay jirin dhismayaal lagu kaydiyo hadhaaga maydadka**, baar, soo qaad muunadaha, sawirka maydka iyo diiwaangeli qaybaha maydadka ka hor inta aan si ixtiraam leh loo aasin isla marka la helo awood buuxda oo ogolaansho ah.

12. Dhaqamada aaska iyo qabuuraaha



Tusaaleynta sawirka ah waxaa diyaariyey igor Malgrati iyo Mirna Noaman/ICRC

Jaantuska 1-aad: Qabriga iyo fogaanta ugu yar


A = Xabaalaha

B = Aag dhexdhexaad ah oo loogu talagalay in lagu beero dhirta xiddadoodu dhulka hoose gaarayaan iyo in xabaalaha laga fogeeyo meelaha la deggan yahay = 10m ugu yaraan

C = Fogaanta u dhaxaysa xabaalaha iyo biyo shubka beeraha = 10m ugu yaraan

D = Fogaanta u dhaxaysa xabaalaha iyo ceelasha biyaha la cabbo, ceelasha riigga iyo ceel-gacmeedyada = 250m ugu yaraan

E = Fogaanta u dhaxaysa xabaalaha iyo ilaha biyaha iyo biyo-mareennada = 30 m ugu yaraan



Tusaaleynta sawirka ah waxaa diyaariyey igor Malgrati iyo Mirna Noaman/ICRC

Jaantuska 2-aad: Qayb qabri ah oo leh cabbiro iyo masaafuoyin(loogu talagalay shakhsi keliya iyo godka aas wadareedka)

A' = Moolka = 1.5m to 3m





B = Fogaanta hoose ee qabriga ilaa meesha siman ee dhulka hoose oo biyaha ka dheregsan waa inay ahaato = 1.2m ugu yaraan (1.5 m haddii ciidu ay tahay bacaad)

C = Godka aas wadareedka ah fogaanta u dhaxaysa meydadka = 0.4m

D = Ballaca qabriga loogu talagalay shakhsi keliya = 0.75m ilaa 1.2m (jalxado 1m ah)

WT = Heerka meesha siman ee dhulka dhulka hoose oo biyaha ka dheregsan(heerkiisa ugu sarreeya)

Inta badan anaga oo la shaqeyneyno la hawlgalayaasheena Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas ayaa waxaan caawinnaa dadka ku nool adduunka oo ay saameysay colaadaha hubaysan iyo qalalaasaha kale, anaga oo sameyneyno wax kasta oo aan awoodno si aan u dhowrno sharaftooda una yareyno dhibaataadooda. Ayada oo la dhiirigeliyaayo lana xoojinaayo xeerka aadamnimada loona doodayo mabaadii'da caalamiga ee bani'aadamnimada ayaa waxaan sidoo kale dooneynaa in aan ka hortagno darxumada.

-  facebook.com/ICRCAfrica
-  twitter.com/ICRC_Africa
-  www.instagram.com/icrc_somalia/
-  blogs.icrc.org/Somalia

Ergada ICRC ee Soomaliya

Waddada Ngecha
Kabete Hoose
S.B 73226-00200
Nayroobi-Kenyaa
T + 254 0709 132 000
SOK-Nairobi@icrc.org
www.icrc.org
© ICRC, Oktoobar 2023

